## SUURAT An-NAJM:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *Wuxuu ku dhaartay (Eebe) Xiddiggu markuu hoobto.*
2. *Ee saaxiibkiin (Nabigu) ma dhumin, xaqana kama leexan.*
3. *Kumana hadlo hawadiisa.*
4. *Quraankuna waxaan waxyi Eebe ahayn ma aha.*
5. *Waxaana wax baray (oo xagga Eebe ka soo gaadhsiiyay) ku xoog wayn, (Malaku Jibriil).*
6. *Ee caafimaad iyo quwaba leh, abuuriddiisuna egtahay.*
7. *Wuxuu joogay jihadii sare (Jabriil).*
8. *Kaddibna u soo dhawaaday kuna soo hoobtay (Nabiga).*
9. *Intuu uga jirsado Qaanso (xadhiggeed) ama ka dhaw.*
10. *Wuxuuna Eebe u waxyooday Addoonkiisa (Nabiga) wuxuu u waxyooday.*

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Eebe wuxuu ku dhaartaa wuxuu doono oo khalqigiisa ka mid ah, addoomadiisuna kuma dhaartaan waxaan isaga ahayn, siduu sheegay Sheekh Shacbi. Eebana wuxuu halkan ku dhaartay xiddiggu markuu hooban, in Nabigu toosan yahay, xaqna ku hadlo wuxuu sheegina uu yahay wax Eebe ku soo dajiyay uguna soo dhiibay malaku Jibriil, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) had iyo jeer marka waxyi soo dagi wuxuu la kulmi jiray Malaku Jibriil, taasina waxay tummaato ku tahay gaalada iyo xaq diidayaasha diidi xaqnimada Quraanka. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu yidhi: “Anugu kuma hadlo waxaan xaq ahayn.” Waxaa wariyay Imaam Axmed binu Xambal.

11. *Qalbiguna Ma beeniyo wuxuu arkay (Nabigu).*

*12. Ee ma idinkaa ka murmi (kana doodi) wuxuu arkay.*

*13. Dhabnimuu Nabigu u arkay Jibriil mar kale.*

*14. Sidratul-Muntaha agteeda.*

*15. Agteedana waxaa ah Jannatul-ma'waa.*

*16. (Wuxuu arkay) waqtiguu daboolayay Sidrada wax daboola.*

*17. Aragguna kama iilan wuxuu arkay (Nabigu) mana xadgudbin.*

*18. Dhabnimo yuuna u arkay (Nabigu) Aayado Eebe oo waawayn.*

*19. Ka warrama (Sanamyada) Laata iyo Cuza.*

*20. Iya Manaatadii saddexaad ee kale.*

*21. Idinku ma waxaad leedihiin Lab Eebana Dhaddigga.*

*22. Taasi waa qayb dulan ah.*

*23. Sanammaduna magacyo aad magacowdeen idinka iyo Aabayawgiin mooyeen wax kale ma aha, wax xuja ahna Eebe uma soo dajinin, waxaan maala ahaynna ma raacayaan iyo waxa naftooda doonto, xagga Eebana waxaa uga yimid hanuun.*

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***

Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu arkay Malaku Jibriil oo soo gaadhsiinayay waxyiga Eebe marar badan, sidaan (horayba u soo sheegnay) shakina kuma jiro siduu Nabigu Jabriil u arkay, sida oo kale wuxuu arkay Nabigu Aayadi waawayn oo Eebe, maxayse sanamyo ama wax ha garteen ama yay wax garannine la caabudo ama la raaco tari, waa uun halaag iyo luggooyo, illeen xagga Ilaaheenbaa inooga yimid Nuur iyo hanuun ay waajib tahay in la raaco.

*24. Mise dadka waxaa u sugnaaday waxay yididiishaan.*

*25. Aakhiro iyo Adduunba Eebaa iska leh.*

*26. Badanaa Malag Samada ku sugan oon shafeecadiisu waxba anfacaynin in  Eebe idmo mooyee, Cidduu la doono oo ka raalli noqdo.*

*27. Kuwa aan rumaynin Aakhiro waxay Malaa'igta ku magacaabi magac dhaddig.*

*28. Wax cilmi ahna uma laha, ee waxay raaci mala uun, malana xaqa wax kama tarto.*

*29. Ee iskaga jeedso (Nabiyow) Ruux ka tagay xuskayga (Quraanka) oon doonin waxaan nolosha Adduunka ahayn.*

*30. Kaasina waa garaadkooda aqooneed intuu gaadhay, Eebana waa ogyahay cidda ka dhuntay  jidkiisa, waana ogyahay cidda hanuunsan.*

***Sharaxda Suurrada ( 3 )***

Ruuxna siduu doona uun xaalku ma noqdo, ee waa sida amarka Eebe ku fulo, maxaayeelay Aakharo iyo Adduunba Eebaa iska leh, xataa Malaa'igta waxaan Eebe fasixin ma samayn karto cidna uma shafeeci karto idanka Eebe mooyee. Eebana siduu meelo badan oo Quraanka ah ku sheegay uma baahna ehel iyo carruur midna, maxaayeelay khalqiga dhammaantiisba isagaa iska leh, markaas maxay gaaladu u sheegi in malaa'igtu gabdho Eebe yihiin, wax ma oga ee waxay ku socdaan male, muxuuse tari male. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu ku yidhi hadalkiisii saxiixa ahaa (Iska jira malaha, malahu waa ka u Been-san hadale). Eebana wuxuu Nabiga faray inuusan ku daba luggu'in kuwa xaqa ka jeedsaday ee cilmigoodii ku koobay Adduunyo ladaba ordaa uun. Waxaa la wariyay Caa'isha Hooyadii Mu'miniinta ahayd, (Eebe ha ka raalli noqdee) inay tidhi: Rasuulkii Eebe wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiida Eebe ha yeelee): "Adduunku waa guriga Ruuxaan guri lahayn, iyo xoolaha Ruuxaan xoola lahayn, waxaana wax u kulmista Ruuxaan Caqli lahayn." waxaa sheegay Imaam Axmed iyo labadii sheekh. (Bukhaari iyo Muslim)

*31. Samaawaadka iyo Dhulka waxaa ku sugan Eebaa iska leh, si uu ugu abaalmariyo kuwa xumaanta falay camalkoodii, ugana abaalmariyo kuwii wanaagga falay wanaag.*

*32. Waana kuwa ka fogaada dambiga waawayn iyo xumaanta, wax yar yar mooyeen, Eebana waa waasac dambidhaafkiisu, wuuna*

***idin ogyahay markuu idinka abuuray Dhulka iyo markaad ku asturantihiin uurka hooyadiin, ee Naftiinna ha ammaanin Eebaa og cidda dhawrsashada badane.***

***33. Ka warrama midka xaqa ka jeedsaday.***

***34. Oo wax yar bixiyay inta kalana reebtay.***

***35. Ma agtiisa cilmiga maqan yaallaa oo wuu arkaa.***

***Sharaxda Suurrada ( 4 )***

Mar hadduu Eebe cirka, dhulka iyo makhluuqaadka dhammaantiisba leeyahay, uuna cid walba ka abaal marin falkeeda uuna addoomihiisa ka saamixi gafafka yar yar, oo naxariistiisu waasac tahay, wax walbana ogyahay marka ruuxa la abuuro iyo goorkastaba, soo ma wanaagsana in wanaagga lagu dadaalo, xumaanta, isla waynida iyo naftii ammaankana laga fogaado. Maxammad binu Camar ibnu Cadhaa'a wuxuu yidhi, 'waxaan ku magacaaby gabadh tay ah; Barrata, markaasay igu tidhi Saynab binti Abii Salamata: 'Rasuulkii Eebe wuxuu reebay magacan, adna waxaad ku magacawday Barrata, markaasuu Rasuulka Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeele) yidhi: "Naftiinna ha ammaanina Ilaahay waa ogyahay cidda baarriga ah oo idin ka mid ah" markaasay dheheen maxaan ku magacawnaa? wuxuuna yidhi: "ku magacaaba Saynab." waxaa wariyay Muslim, wuxuuna Nabigu reebay inaan dadka ammaanta lagu badinnin, ee khayrka iyo wanaagga uun ha la badsado iyagaa ammaan ugu filane.

***36. Miyaan looga warramin (dadka) wixii ku yiillay Kitaabkii (Nabi Muuse).***

***37. Iyo kii (Nabi Ibraahimkii) ee oofiyay (wixii lafaray).***

***38. Inaan nafna dambi naf kale qaadaynin.***

***39. Ruuxna wuxuusan camalfalin heleeynin***

***40. Camalkiisana la arki doono.***

***41. Ka dibna looga abaalmarin doono si buuxda.***

***42. Eebaa xaggiisana loo ahaan.***

***43. Eebe waakan wax ka qosliya kana oohiya.***

***44. Isagaana wax dila waxna nooleeya.***

***45. Isagaana abuuray labada nooc ee ah lab iyo dhaddigba.***

***46. Kana ahaysiiyay dhibic soo baxday.***

***47. Isagaana ahaysiin soo celinta kale***

***48. Eebe isagaa wax Hodmiya isagaana wax faqiiriya.***

***49. Waana Eebaha xiddigga Shicra.***

***Sharaxda Suurrada ( 5 )***
Aayadahani waxay caddayn sida aayado badan oo kalaba in Naf walba laga abaal marin waxay camal fasho, nafna naf kale dambigeed ayna qaadaynin, ruux walbana uu arki camalkiisa, xaalkuna wuxuu ku dhammaan Eebe xaggiisa. Cumar binu Maymuun waxa laga wariyay inuu yidhi: 'waxaa na dhex istaagay Macaad binu Jabal wuxuuna yidhi: 'ree Awdoow waxaan ahay farriintii Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) idiin soo diray, waana ogtihiin in Eebe loo ahaan, ama Janna ama Naar.' waxaa wariyay Ibnu Abii Xaatim. Eebana waa ka qosliyaha, ka oohiyaha, dilaha, nooleeyaha, abuuraha soo celiyaha, hodmiyaha, faqiiriyaha, iyo Eebaha makhluuqaadka dhammaantood, ee waa in ruux walba uu u darbadaa inuu la kulmi camalkiisa, macaan iyo khadhaadhba

***50. Eebe isagaa halaagay Caadkii hore.***

***51. Iyo Thamuudba waxna kama reebin.***

***52. (Nabi Nuux) Qoomkiisiina horuu (u halaagay), waxayna ahaayeen kuwa dulmi badan oo xadgudub badan.***

***53. Qoomkii (Nabi Luudhna) wuu riday (Eebe).***

***54. Wuxuuna ku daboolay wuxuu ku daboolay (oo caddibaad ah).***

***55. Teebaadse nicmooyinka Eebe shakinaysaan (kana doodaysaan) dadow.***

***56. Kan (Nabiga iyo Quraankuba) waa dige ka mid ah u digayaashii hore.***

***57. Wayna dhawaatay Saacaddi Qiyaame.***

***58. Wax Eebe ka soo hadhay oo ogna ma jiro (markay dhici).***

***59. Ma quraankanaad la yaabantihiin.***

***60. Ood qoslaysaan (idinkoo beenin) oydaanna ooyeynin (cabsi darteed).***

***61. Idinkoo waliba hilmaansan (islana wayn).***

***62. Ee dadow Eebe u sujuuda caabudana.***

***Sharaxda Suurrada ( 6 )***
Eebe awooddiisa yaa wax walba ku jiraa, hadduu doonana wuu halaagaa cidduu doono sida kuwaas Quraanka in badan ka warramay oo kale, maxaayeelay way kibreen nicmada Eebana way beeniyeen iyo xaqaba, saas daraadeed waa in Eebe laga yaabo, qiyaamadana loo darbado, quraankana la rumeeyo, kibir, isla wayni iyo qosol xaq ku beeninna la iska jiro, sujuudda Eebe iyo cibaadadiisana la badiyaa, iyo xumaantaada oo laga ooyaa, Ibni Cabbaas wuxuu yidhi: ‘ waxaa sujuuday Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) (markuu akhriyay) ‘An-Najm’ waxaana la sujuuday muslimiintii, mushrikiintii, jinni iyo insiba.’ waxaa wariyay Bukhaari.